

La shaqeynta Adeegyada Carruurta Gobolka Hamilton

Hagida qoysaska

La shaqeynta Foomka Saxiixa Adeegyada Carruurta Gobolka Hamilton

Magaca Dacwada:	Lambarka Dacwada:
Magaca Macmiilka (QOR magaca buuxo ee Macmiilka Saxiixayo foomkaan):	Aqoonsiga Qofka SACWIS:

Xeerka Adeegyada Carruurta Gobolka Hamilton wuxuu u baahanyahay in shaqaalahaaga dacwada ku siiyo koobiga buug-yaraha “La shaqeynta Adeegyada Carruurta Gobolka Hamilton” kulankaaga koowaad. Aqrinteeda waxay kaa caawineysaa fahamka waxa la filanayo inagoo ku lugleh qoyskaaga.

Adeegyada Carruurta Gobolka Hamilton waxaa ka go'an inuu ka illaaliyo carruurta xadgudubka, dayacaada, iyo ku tiirsanaanta markii qoysaskooda aysan u suurtogaleynin ama aysan rabin inay sidaas sameeyaan.

Waxaa naga go'an inaan dhowrno oo aan xoojino qoysaska oo aan ixtiraamno sharafkooda.

Waxaan ku dadaalnaa inaan gaarno yoolalka badqabka, si joogto ah, iyo fayo qabka carruurta iyadoo loogu doodayo xaquuqahooda oo la siinayo adeegyo waxtar leh carruurta iyo qoyaska ku jiro heerka waxqabadka ugu yar sida looga baahanyahay sharci ahaan.

- Waan fahamsannahay inaan leeyahay xaquuqda loogu adeegayo takoorid la'aan ku saleysan da'da, jinsiga, asalka dhalashada, diinta, jinsiga, dooqa galmada, hab nololeedka, ama naafonimada jireed, maskaxda, ama hormarinta.

- Waxaan helay buug-yaraha ama linkiga “Lala shaqeynta Adeegyada Carruurta Gobolka Hamilton”

_____ _____
Macmiilka, Saxiixa Waalidka/Masuulka Taariiqda La helay

_____ _____
Macmiilka, Saxiixa Waalidka/Masuulka Taariiqda La helay

Isticmaalka Gudaha Kaliya
☐Waxaan u siiyay koobiga buug-yaraha macmiilka qaabka xiggo:
☐Qof ahaan ☐I-meelka ☐Koobiga la Daabacay ☐Wax kale (Fadlan Qeex) _____
☐Waxaan siiyay koobi buug-yaraha macmiilka, laakin macmiilka wuu diiday inuu saxiixo.
☐Maanan siinin macmiilka koobiga buug-yaraha.

Haddii aad wax su'aalo ah qabtid, soo wac shaqaalaha dacwadaada ama kormeerahiisa/kormeeraheeda hoos ku qoran:

Magaca Shaqaalaha dacwadaada:	Taleefonka:
Magaca Kormeeraha:	Taleefonka:

Xafiiska Guud:

222 East Central Parkway,
Cincinnati, OH 45202

(513) 946-1000

Websaydka: www.hcjfs.org

Ku saabsan Adeegyada Carruurta Gobolka Hamilton

Adeegyada Carruurta Gobolka Hamilton waa qeyb Waaxda Shaqada iyo Adeegyada Qoyska ee Gobolka Hamilton. Sharciga Ohio wuxuu u baahanyahay Adeegyada Carruurta si loo helo oo loo qoro wargelinadoo dhan ee xadgudubka iyo dayacaada oo loo illaaliyo carruurta lagu xadgudbo, la dayaco, ama ku tiirsan oo illaalo u baahan.

Adeegyada Carruurta waxay aaminsanyihiin inay u wanaagsantahay carruurta inay ku noolaadaan goob qoys. Waxaan ku dadaalnaa inaan ka caawino qoysaska inay wada joogaan iyagoo xalinayo dhibaatooyinka. Laakin markii waaladiinta aysan rabin ama aysan u suurtogaleynin inay illaaliyaan carruurtooda, Adeegyada Carruurta ay hormariso qorsho loogu haynayo canuga badqab. Tan waxay noqon kartaa labadaba qorshooyinka guriga iyo qorshooyinka guriga ka baxsan.

Helida Wargelinada Si xun ula dhaqanka (241-KIDS)

241-KIDS waa qadka 24-ka saac ee Gobolka Hamilton oo lagu soo wargeliyo xadgudubka ama dayacaada carruurta ka hooseyso da'da 18 (ama da'da 21 haddii jir ahaan, maskax ahaan ama hormar ahaan caqabad tahay). Qof walba, oo ay ku jiraan xirfadlayaasha (sida macalimiinta iyo dhaqaatiirta), ayaa ku soo wici karo 241-KIDS markii ay qabaan sabab lagu aaminayo in canug lagu xadgudbay ama la dayacay. Carruurta ayaa sidoo kale soo waco inay soo sheegaan xadgudubka ama dayacaada qaraabada, saaxibka, ama nafsadooda.

Maxaan ka filan karaa markii Adeegyada Carruurta soo booqato gurigeyga?

Sharciga Ohio ayaa u baahan in Adeegyada Carruurta ay dhameystirto qiimeynta badqabka kadib helida wargelinta ku saabsan carruurta laga yaabo in lagu xadgudbay ama la dayacay.

Sida waafaqsan sharciga Ohio:

Xadgudubka canuga waa:

- Halis gelinta canuga.
- Dhaawac aan shil aheyn ee canuga.
- Anshaxa galmada ama xiriirka u dhaxeeyo qofka weyn iyo canuga.
- Dhaawaca jireed ama maskaxda waxyeesho ama u hanjabaado waxyeelida caafimaadka carruurta ama daryeelka.

Dayacaada canuga waa:

- Cunto aan ku filneyn, hoyga, kormeerida, waxbarashada, ama daryeelka caafimaadka ee canuga sabab la xiriirto qaladaadka waalidka ama dhaqamada.

Shaqaalaha dacwada Adeegyada Carruurta kaasoo kuugu yimaado gurigaaga wuxuu bilaabaa qiimeyn. Shaqaalaha dacwada ayaa kuu sheegayo walaacyadee ayaa la soo sheegay oo wuxuu ku baarayaa isagoo kula hadlayo adiga, carruurtaada, dugsigooda, qaraabada xirfadlaha kale, qaraabada, iyo dariska, haddii ay muhiim tahay oo ay ku haboontahay. Sida waafaqsan sharciga Ohio, kuuma sheegi karno cida nasoo wacday.

Qodobada muhiimka ah ee la xasuusto:

- Dhameystirka qiimeynta bilowga kadib, Adeegyada Carruurta waa inay sameysaa mowqifka dacwada. Mowqifkaas wuxuu soo afjarayaa xad gudubka ama dayacaada waa “la xaqiijiyay” (cadeynta tooska ah ee ula dhaqanka xun), “la tilmaamo” (aastaamaha laakin aan laheyn cadeyn toos ah), ama “aan la xaqiijin” (xaqiiq la'aan ah).
- Haddii qiimeynta ay go'aamiso in carruurtaada ay badqab ku yihiin daryeelkaaga, kuma sii jireyno ku lug lahaanshaha. Badelkeeda, waan xireynaa dacwadeena ama waxaan kuu gudbineynaa adeeg kaloo bulsho oo taageerada markii loo baahanyahay.
- Haddii qiimeynta ay go'aamiso in carruurtaada aysan badqab aheyn, Adeegyada Carruurta waxay kuula kaashanayaan abuurista qorshaha loogu haynayo carruurtaada badqab iyadoo laga caawinayo qoyskaaga walaacyada la aqoonsaday.

Ka waran haddii Adeegyada carruurta ku sii lug yeeshaan qoyskeyga?

Adeegyada Carruurta waxay u gudbinayaan dacwadaada Shaqaalaha dacwada Socdo haddii adeegyo dheeraad ah loo baahdo. Shaqaalahaan dacwada wuxuu kaala kaashanayaa hormarinta iyo hirgelinta qorshaha dacwada oo qoyskaaga ah. Qotshaha wuxuu qeexayaa yoolalka, tallaabooyinka, adeegyada, iyo isbadelada looga baahanyahay badqabka carruurtaada. Waxaa lagu weydiinayaa inaad saxiixdid qorsho oo waxaa lagu siinayaa koobi.

Sababtoo ah waan ka walaacsannahay wax ku saabsan fayo qabkaaga iyo badqab canugaaga, shaqaalaha dacwadaada ee Adeegyada Carruurta ayaa si joogta ah kuu soo booqanayo. Waxaan ka wada shaqeyneynaa kala hadlida hormarka aad ku sameyneysid raacida qorshahaaga. Waxaa sidoo kale lagu weydiinayaa ka qeybqaadashada qiimeynta hormarkaaga. Waan kaala sii qeybqaadaneynaa illaa aan ka go'aansano inaadan markale u baahneyn caawinteena loogu haynayo carruurtaada badqab.

Si loo gaaro bartaas, daryeelayaal badan ayaa isku raacay inay ka qeybqaataan adeegyada sida la talinta, fasalada waalidnimada, ama daaweynta daroogada. Adeegyadaan waxay caawiyeen qoysas badan oo Gobolka Hamilton. Haddii daryeelayaasha diidaan inay ka qeybqaataan, Adeegyada Carruurta waa inay go'aansadaan haddii la raadinayo waxqabadyo kale, sida ku luglahaanshaha Maxkamada Dhalinyarada Gobolka Hamilton, ayaa looga baahanyahay inay illaaliso canugaaga.

Waxyaabaha muhiimka ah ee inaad ogaato

- Adeegyada Carruurta waxay baaraan wargelinada xadgudubka iyo dayacaada oo waxay siisaa adeegyo qoysaska si ay u yareyso ula dhaqanka xun ee carruurta.
- Mararka qaar, xadgudubka carruurta iyo dayacaada waxay noqon kartaa dambi. Adeegyada Carruurta waa inay ku soo wargeliyaan dambiyada suurtogalka ah booliska. Adeegyada Carruurta ma sameeyaan xiritaan. Kaliya booliska ayaa xiri karo dadka oo ku dalaci karo iyaga dambiga.
- Adeegyada Carruurta waxay ku talin karaan in carruurta laga saaro guriga oo waxay ka caawinayaan go'aaminta haddii iyo goorta ay soo laabanayaan. Maxkamada Dhalinyarada Gobolka Hamilton ayaa gaarayo go'aanka ugu dambeeyo.
- Xeerka Daryeelka Carruurta Hindida (ICWA) waa sharci faderaal ah oo sharciyeeyo sida hay'adaha daryeelka carruurta u siiyaan adeegyo carruurta iyo qoyaska Ameerikaanka Dhaladka ah. Haddii canugaaga uu yahay xubin ka tirsan qabiilka, ama laga yaabo inuu u qalmo xubinnimada, qoyskaaga wuxuu xaq u leeyahay in la siiyo adeegyo dheeraad ah. Fadlan u sheeg shaqaalahaaga bulshada haddii aad aaminsantahay in canugaaga uu yahay xubin qabiil ama laga yaabo inuu u qalmo inuu mid noqdo. Hay'ada ayaa xaqiijineyso xubinnimada qabiilka. Qabiilka hindida iyo qaraabada balaaran waxaa la siinayaa fursada ay idinkula shaqeeyaan adiga iyo shaqaalaha dacwada si aad u sameysaan, u hirgeliyaan, oo dib ugu eegaan qorshaha dacwada.

Adeegyadee ayaa caawin karo qoyskeyga?

Si loo yareeyo walaacyada badqabka ee carruurtaada, Adeegyada Carruurta ayaa ku siin karo ama kuu gudbin karo adeegyada sida:

- La talinta iyo daaweynta caafimaadka damiirka
- Daaweynta caafimaadka
- Baaritaanka iyo daaweynta daroogada ama alkulada
- Tababarka xirfadaha waalidnimada
- Adeegyada waxbarashada
- Caawinta guriyeynta
- Caawinta degdega ee guriga si loo xaliyo dhibaatada qoyska iyo arrimaha kale ee halista ah (illaalinta qoyska)
- Daryeelka waqtiga barkii ee carruurta si ay u siiso waalidka murugeysan nasiinyo (daryeelka carruurta illaalsan)
- Adeegyada hormarinta bulshada ee carruurta.
- Barnaamijyada dhaliinta dhibaateysan
- Adeegyada Booqashada

Maxaa la iweydiinayaa inaan sameeyo?

Iyo caawinta Adeegyada Carruurta, waxaad haysataa fursada looga adkaado dhibaatooyinka ku sababay in carruurtaada aysan badqab ahaan. Adeegyada Carruurta waxay kaa filanayaan:

- La shaqeynta shaqaalaha dacwadaada si aad u sameysaan qorshaha lagu yareynayo walaacyada badqabka ee carruurtaada.
- Ka qeybqaadashada barnaamijyada iyo adeegyada ku qoran qorshahaaga.
- Sameynta isbadelada ka caawineysa hubinta guri badqab ah, nadiif ah, oo kobcin u leh carruurtaada iyo cunto ku fillan, dhar, iyo daryeelka caafimaadka.
- Si joogta ah ua kulan shaqaalaha dacwadaada iyo xirfadlayaasha si ay dib ugu eegaan hormarkaaga.
- Ka qeybgal dhageysiyada oo raac amarada maxkamada, haddii dacwadaada ay ku lugleedahay Maxkamada Dhalinyarada Hamilton.

Ka waran haddii carruurteyda ay tahay inay ka tagaan guriga?

Xaaladaha aan degdega aheyn, markii Adeegyada Carruurta ay tixgeliyaan ka saarida canuga guriga, kulan hore ayaa la qabtay, oo loo yaqaan Shirka Qoyska. Taageerooyinka qoyska, qaraabada, iyo xirfadlayaasha kale ee ku lugleh dacwadaada ayaa kala qeybgeli karo Adeegyada Carruurta. Waa inaad ka qeybgashaa kulankaan, si markaas aad uga caawisid go'aaminta ku saabsan carruurtaada iyo caawinta qoyskaaga u baahanyahay.

Maxkamada Dhalinyarada Gobolka Hamilton waa inay bixiyaan ogolaansho ka hor inta aysan Adeegyada Carruurta ka saarin carruurta gurigaaga. Markaa, Adeegyada Carruurta waxay raadisaa meeleyn ku meelgaar ah oo meel gaar ah oo loo helayo si ay u daboosho baahiyaha carruurta. Tan ayaa wuxuu noqon karaa saaxib, qaraabo, korsade, ama kooxda guriga.

Iyo tallada ka imaaneyso dhinacyada, Maxkamada Dhalinyarada Gobolka Hamilton ayaa go'aansanayo booqashada canuga ku haboon. Haddii walaaca badqabka ee canugaaga la baabi'iyo, carruurtaada waxaa lagu celinayaa daryeelkaaga. Laakin haddii walaacyadaas badqabka ay sii jiraan, meeleynta carruurtaada ayaa waxay noqon kartaa mid joogto ah.

Waa maxay xuquuqdeyda?

Markii aad ku lugleedahay Adeegyada Carruurta, waxaad xaq u leedahay in:

- Laguugula dhaqmo xushmad oo ixtiraam leh.
- Shaqaalaha dacwada ee dhageysto baahiyahaaga iyo walaacyadaada oo adiga kula shaqeeyo. Shaqaalaha dacwadaada waa inuu u maareeyaa dacwadaada qaab daryeel, gaar ah, oo xirfadeysan.
- Diid inaad la shaqeysid qiimeynta.
- Diid inaad aqbashid adeegyada ay ku taliyeen Adeegyada Carruurta ee ku saleysan iqtiyaarka.
- Ka qeybqaado diyaarinta qorshaha dacwada. Waxaad sidoo kale heleysaa koobiga qorshaha.
- Jawaabo cad, oo daacad ah oo su'aalahaaga si markaas aad u fahamtid sababta go'aamada loo gaaray iyo tallaabooyinka laga qaaday dacwadaada.
- Lagu ogeysiiyo wax ku saabsan qaababka lagu helo caawin haddii Adeegyada Carruurta aysan caawin karin qoyskaaga.
- Ogeysiin qoran oo dhageysiyada Maxkamada Dhalinyarada Gobolka Hamilton iyo tallaabooyinka ku saabsan dacwadaada haddii maxkamada ay ku lug leedahay.
- Ku lug lahaataa oo lagu soo ogeysiiyaa wax ku saabsan caafimaadka, waxbarashada, iyo fayo qabka canugaaga.
- Laguugu adeegaa takoorid la'aan ku saleysan da'da, jinsiga, asalka dhalashada, diinta, jinsiga, dooqa galmada, hab nololeedka, ama naafonimada jireed, maskaxda, ama hormarinta.
- Sheeg walaacyo walba ee aad qabtid iyo xareysid cabasho.

- Carruurta guriga laga saaray sidoo kale waxay leeyihiin xuquuq. Xeerka Maamulka Ohio ee 5101:2-5-35 ayaa qeexaya biilka xuquuqaha ee barbaarinta. Dhallinyarada gelaysa daryeelka korinta waxay xaq u leeyihiin in la siiyo nuqul ka mid ah qaan-sheegga dhalinyarada korinta iyo/ama koobiga JFS01677 "Buugga Xuquuqda Dhallinyarada ee Korinta.

Sidee ayaan u caawin karaa Adeegyada Carruurta si ay carruurteyda si fiican ugu adeegaan?

Waxaa dhoor qaabab aaad ku caawin karaa:

- Warbixin run ah.
- La shaqeey shaqaalaha dacwadaada iyo dadka kale ee isku dayayo inay ku caawiyaan.
- U dhaqan si aad u wanaajisid xaalada qoyskaaga ee wanaaga carruurtaada.
- Ka qeybqaado hormarinta qorshaha dacwadaada.
- Raac qorshaha dacwadaada oo ka qeybqaado adeegyada.
- Ka qeybgal kulamada ku saabsan dacwadaada—iyo dhageysiyada maxkamada haddii maxkamada ay ku lugleedahay.
- Noo sheeg haddii aad dhibaato ku qabtid adeegyadeena, marka waxaa laga yaabaa inaan si fiican kugu adeegno.

Ka waran haddii aan dhibaato ku qabo Adeegyada Carruurta?

Cabashada Tallaabada/Amarka Maxkamada

Waxaa laga yaabaa inaadan marwalba ku raacin go'aanadeena ama tallaabooyinkeena. Haddii dacwadaada ay ku lugleedahay Maxkamada Dhalinyarada Gobolka Hamilton, waxaa laga yaabaa inaadan marwalba ku raacin tallaabada ama amarka maxkamada. Kuwa xiggo waxay kaa caawineysaa wax ka qabashada dhibaatooyinka ama qilaafyada laga yaabo inaad ka qabtid dacwadaada.

Haddii aad rabtid inaad sameysid cabasho ku saabsan tallaabada maxkamada ama amarka maxkamada, waa inaad la xiriirtaa qareenkaaga ama aad sheegtid walaaca dhageysiga maxkamada ee xigta. Kaliya maxkamada ama garsoorka dacwadaada waxay leeyihiin maamulka ugu dambeeyo ee lagu badelayo tallaamada maxkamada ama amarka maxkamada. Tusaalooyinka tallaabooyinka maxkamada ama arimaha waa:

- Booqashada
- Meeleynta koriyaha
- Adeegyada qorshaha dacwada maxkamada amartay
- Fasaxida cabashada iyo ama joojinta ku lug lahaanshaha maxkamada
- Amarada Kormeerida Illaalada, haynta Ku meelgaarka ama Kumeelgaarka ee hay'ada ama dhinacyada ku lugleh

*Haddii uu jiro cabashooyinka/caloolnimada ee la xiriirto tallaabada maxkamada, waxaad u baahaneysaa inaad si toos ah ula xiriirtaa Maxkamada Dhalinyarada Gobolka Hamilton si aad ugu sheegtid walaacyadaas. Haddii ay jiraan cabashooyin gaar ah ee la xiriiro qareenkaaga ama difaacaha dadweynaha, waxaad u baahaneysaa inaad si toos ah ula xiriirtid xafiiska qareenka ama xafiiska qareenka ama xafiiska Difaacaha Dadweynaha Gobolka Hamilton.

Racfaanka Mowqifka Dacwada

Markii baaritaan la dhameystiro, waxaad heleysaa warqad sharaxeyso mowqifka shaqaalaha dacwada. Haddii ay jireen cadeyn ama tilmaam xadgudubka ama dayacaada, in qof laga yaabo inuu codsado racfaan. Kaliya dambiilayaasha la eedeeyay (racfaan qaataha) ayaa xareyn karo racfaanka mowqifka wargelinta. Haddii aad rabtid inaad ka racfaan qaadatid mowqifka, waa inaad ku codsataa dhageysi 30 maalmood kalendarka ah gudahood ee laga bilaabo taariiqda warqada mowqifka waxaa lagu diraa midkood adoo wacayo 513-946-1313 ama u soo

qorayo:

Fiiro gaar ah: Jadwaleeyaha Dhageysiga Adeegyada Carruurta
Shaqada iyo Adeegyada Qoyska Gobolka Hamilton
222 East Central Parkway
Cincinnati, OH 45202

Markii la helo codsiga racfaanka, jadwaleynta dhageysiga ayaa la xiriirayo racfaan qaataha si u dajiyo dhageysiga. Jadwaleeyaha dhageysiga ayaa kadib siinayo racfaan qaataha warqad ogeysiin ah ee taariiqda, saacada, iyo goobta dhageysiga. Koobiga Xeerka Adeegyada Carruurta ee Racfaanada ee Mowqifka Dacwada ayaa lagu darayaaa ogeysiinta.

Dhageysiyada racfaanka waxaa la jadwaleeyaa labo saacadood oo maqal ahaan ayaa loo duubayaa. Dhammaan dhinacyada ee ku marqaati kacayo waa la dhaarinayaa. Sarkaalka dhageysiga wuxuu soo gudbinayaa wargelin qoran oo xigta dhageysiga racfaanka. Go'aanka sarkaalka dhageysiga ayaa ah xalinta ugu dambeyso ee gudaha Adeegyada Carruurta Gobolka Hamilton.

Cabashada Tallaabada ama Go'aanka Shaqaalaha dacwada

Waaladiinta, illaaliyayaasha, masuulada sharciga ah, daryeel siiyayaasha koriyaha, daryeelaha qaraabada ah, codsadayaasha ama bixiyayaasha diyaarinada noolaanshaha la kormeeray ama la ansixiyay, iyo carruurta dhax gashay hay'ada oo bixinta adeegyada waxay xaq u leeyihiin inay ka hadlaan walaacyada la xiriiro dhaxgalka.

Haddii aad qabtid cabasho la xiriirto ama go'aanka uu gaaray shaqaalaha dacwadaada, waa inaad isku daydaa inaad la xalisid arinta shaqaalaha dacwada marka hore. Tusaalooyinka cabashooyin noocaas ah waa:

- Inaan laguugula dhaqmin xushmad iyo ixtiraam
- Aan lagu siin cod diyaarinta qorshaha dacwada
- Aan lagu siin jawaab cad ee su'aalahaaga si markaas aad u fahamtid sababta go'aamada loo gaaray
- Ku diidista adeegyada ku jiro qorshaha dacwada

Ka waran haddii taasi aysan caawin?

Haddii adiga iyo shaqaalaha dacwada uusan xalin karin dhibaatada, raac tilmaamahaan:

Tallaabada 1: La hadal Kormeeraha

- Soo wac 513-241-KIDS (5437) oo weydii magaca iyo lambarka taleefonka kormeeraha shaqaalaha dacwada.
- La xiriir kormeeraha shaqaalaha dacwada. Waxaad kala hadli kartaa kormeeraha taleefonka ama aad weydiin kartaa kulan.
- Qeex walaacyadaada oo u sheeg kormeeraha sababta aadan u qanacsaneyn.
- Dhageyso oo weydii su'aalo.
- Kormeeraha wuxuu dhageysanayaa oo kaala shaqeynayaa xalinta dhaibaatada.
- Waxaa sidoo kale laga yaabaa in laguugu jiheeyo Xafiiska Xaquuqaha Macmiilka ee HCJFS
- Haddii aadan ku qanacsaneyn jawaabta kormeeraha, qaad tallaabada 2.

Tallaabada 2: La hadal ama la Kulan Madaxa Qeybta

- Soo wac 513-241-KIDS (5437) oo weydii magaca iyo lambarka taleefonka ee madaxa qeybta kormeeraha. Waxaad sidoo kale weydiisan kartaa shaqaalaha dacwadaada ama kormeeraha magaca iyo warbixinta xiriirka madaxooda qeybta.
- La soo xiriir madaxa qeybta. Madaxa qeybta ayaa midkood kaala hadlayo taleefonka ama kulan kuu balamiyo.
- Madaxa qeybta ayaa dhageysanayo walaacyadaada oo kaala shaqeynayo xalinta dhibaatada.
- Waxaa sidoo kale laga yaabaa in laguugu jiheeyo Xafiiska Xaquuqaha Macmiilka HCJFS
- Haddii aadan ku qanacsaneyn jawaabta madaxa qeybta, qaad tallaabada 3.

Tallaabada 3: La soo xiriir Xafiiska Xaquuqaha Macmiilka

- Ka soo wac Wakiilka Macmiilka Xafiiska Xaquuqaha Macmilka HCJFS 513-946-2466, dheeraadka 1, ku soo dir fariin HCJFS.org, adoo isticmaalayo badhanka Xiriirka, ama i-meel ku soo dir HamiltonCountyCRO@jfs.ohio.gov
- Xubinta shaqaalaha ee Xafiiska Xaquuqaha Macmiilka ayaa dhageysanayo walaacyadaada oo kaala shaqeynayo xalinta dhibaato, haddii ay suurtogal tahay.
- Shaqaalaha Xaquuqaha Macmiilka ayaa kula jadwaleyn karo kulan adiga ah. Shaqaalaha dacwada iyo midkood madaxa qeybta ama kormeeraha ayaa la weydiinayaa inay ka soo qeybgalaan. Waxaa lagu weydiinayaa inaad sharaxdid walaacyadaada.
- Kormeeraha ama madaxa qeybta ayaa sharaxayo go'aamada ama tallaabooyinka ku saabsan dacwada iyo sababta loo qaaday.
- Koox ahaan, waan ka wada shaqeyneynaa oo aan dajineynaa qorshaha lagu xalinayo walaacyadaada.
- Xafiiska Xaquuqaha Macmiilka ayaa laga yaabaa inuu kuu soo diro warqad sharaxeyso walaacyadaada iyo tallaabooyinka hay'ada ay qaadeyso ama aysan qaadeynin.

Haddii dacwadaan ay maxkamad ku lugleedahay, hay'ada waxay u baahaneysaa ansixinta Maxkamada ee lagu

sameynayo isbadelo walba.

Miyaan hayaa dooqyo kale oo lagu xalinayo dhibaatooyinka?

Waaxda Ohio ee Shaqada iyo Adeegyada Qoyska waxay hubiyaan in dhammaan hay'adaha adeegyada carruurta dadweynaha ay raacaan sharciyada gobolka. Haddii aad rabtid inaad la xiriirtid Waaxda Shaqada iyo Adeegyada Qoyska Ohio oo sabab walba, waxaad soo wici kartaa Qadka Caawinta Macmiilka ee lambarka xiggo:

Waaxda Shaqada iyo Adeegyada Qoyska Ohio
Talleefon Bilaash eh: 1-866-635-3748, Iqtiyaar 2, Kordhinta 3

Soo xareey Cabashada Qoyska ama Cabashada Dhalinyarada

Waxaad si toos ah ugu soo gudbin kartaa cabashooyinka Xafiiska Sarkaalka baaraha Dhalinyarada iyo Qoyska haddii aad horaan isugu dayday xalinta arimahoo dhan adoo ku xareynayo cabashooyin rasmi ah HCJFS iyo xalin la aqbali karo lama gaarin. Cabashooyinka waxaa xareyn karo kuwa ka hooseeyo 18, dhalinyarada oo dhawaan ka weynaaday daryeelka korinta, dadka weyn, oo sidoo kale ku soo gudbin karo cabashooyinka matalaada carruurta.

- Xafiiska Sarkaalka baaraha Dhalinyarada iyo Qoyska

| PO Box 182133 Columbus OH 43218 |

1-877-OH YOUTH ama 1-877-649-6884

Haddii aad aaminsantahay inaad bartilmaameed u aheyd takoorid sababtoo ah da'daada, jinsiga, asalka dhalashada, dooqa galmada, jinsiga, midibka, diinta ama naafanimada, xiriirka:

Hamilton County Job & Family Services, Office of Client Rights,
(513)-946-2466

- Ohio Department of Job and Family Services, Bureau of Civil Rights
  30 East Broad Street, 30th Floor
  Columbus, Ohio 43215-3414
  Taleefonka: (614) 644-2703 or 1-866-227-6353
  Fakiska: (614) 752 – 6381
  eFax: bcr-fax@jfs.ohio.gov
  eMail: Civil_Rights@jfs.ohio.gov

ama

- U.S. Department of Health and Human Services
  Office for Civil Rights, Region V
  233 North Michigan Ave., Suite 700
  Chicago, Illinois 60601
  Taleefonka: 312-886-1709

Isgaarsiinta Habraaca Cabashadaan ee Shaqsiyaadka Xadidan Aqoonta af Ingiriiska ama Qabo Naafonimada Aragga iyo Maqalka

Haddii aad qabtid aqoonta af Ingiriiska xadidan, HCJFS waxay ku siineysaa turjubaan xirfadle u qalma. Haddii aad qabtid naafonimada maqalka ama aragga, HCJFS waxay kuu sameyneysaa qaabilaada ku haboon si ay u hubiyaan in habraacaan dib loo eego oo lagaala hadlo iyo in su'aalahaaga looga jawaabo si aad ku qanacsantahay.